# Casharka Labaad

## CADKA DAD WALAALEEYA AMA ISKU DIRA (SHEEKO)

**Xujadii Wiilwaal:** Garaad Wiilwaal waxaa uu ahaa nin garaad ah oo ka talin jiray deegaanka hadda ay magaalada Jigjiga ku taallo. Garaadka wuxuu ahaan jiray nin xukun adag oo xujo badan. Garaadka wuxuu damcay in uu ogaado qofka dadka ugu xikmadda badan. Markaas wuxuu go,aansaday in uu dadka oo dhan xujo usoo jeediyo. Dadkii deegaanka joogay oo dhan ayuu isugu yeedhay. Markii dadku ay shirkii yimaadeen ayaa wuxuu u sheegay xujadiisii. Garaadka wuxuu yidhi ”Maanta waxaan idinka rabaa in nin waliba uu qalo neef adhigiisa ka mid ah dabadeedna uu ii keeno ”Cadka dadka walaaleeya” Wuxuuna dadka u sheegay qofkii ku guulaysta xujadaas in uu siin doono hadiyad qaali ah.

**Dadkii maxay sameeyeen**. Dadkii ayaa guryihii ku laabtay dabadeedna qof kastaa wuxuu billaabay in uu neef adhiga ka mid ah qalo. Dabadeedna uu soo jaro cad ka mid ah hilibka neefka la qalay, oo markaas uu qofku is leeyahay waa cadkii uu rabay Wiilwaal. Dadku waxaa ay billaabeen in ay kala qarsadaan qof waliba cadka uu soo jarayo, si markaasi dadka kale aysan uga qishin sirtiisa. Xilligii la ballamay ayay dadku billaabeen in ay mid mid u yimaadaan xaruntii Wiilwaal iyada oo qof waliba uu saxan ama maro ku wado cadkii uu xujada ku furi lahaa.

**Gabadh ka qayb qaadanaysa furidda xujada**: Haddaba waxaa jiray reer caydh ah oo xoolo yar lahaa, waxay lahaayeen dhawr neef oo adhi ah oo kali ah. Odayga reerka waxaa la odhan jiray Qawdhan gabadhiisa oo gashaanti ahna waxaa la odhan jiray Qarad. Oday Qawdhan wuxuu u yimid gabadhiisii wuxuuna ku yidhi;

**Qawdhan**: Aabbo Wiilwaal ayaa nasoo xujaystay, oo wuxuu rabaa in aan neef qalno oo neefka aan ka soo goyno ”cadka dadka walaaleeya”.

**Qarad**: Way fikirtay. Waxay ogaatay in cadka dadka walaaleeya uu yahay hunguri. Markaas ayay aabbeheed ku tidhi; aabbo waxaad qashaa wanka yar ee xerada ku jira.

**Qawdhan**: Aabbo wan yar lama rabo ee waa in aan qalnaa wan wayn, mana hayno ee maxaan samaynaa?

**Qarad**: aabbo wan wayn laguma waydiin, cad ayaa lagu waydiiyay. Cadkiina wanka yarba wuu ku yaallaa. Marka wanka noo soo qabo.

**Qawdhan**: Maandhaay armaad maanta na ceebaysaa. Waxaan ka cabsanayaa in uu Wiilwaal i ganaaxo.

**Qarad**: Aabbo orod wanka soo qabo oo gawrac. Aniga xujada waan fahmay.

**Qawdhan**: Wankii ayuu soo qabtay oo gawracay, dabadeedna qalay.

**Qarad**: Dabadeedna Qarad wankii ayay ka soo goysay hungurigii oo inta ay

maro ku duuduubtay ay odayga ku tidhi, aabbo orod oo cadkan u gee Wiilwaal.

**Qawdhan**: aabbo miyaad na waalaysaa, ma in la i dilo ayaad rabtaa? Sidee baan cad hunguri ah ugu geeyaa Wiilwaal oo Garaadkii reerka ah.

**Qarad:** Aabo xujadan si fiican ayaan u fahmay. Marka aabbo warka badan jooji oo cadkan u gee Wiilwaal.

**Qawdhan:** wallee maanta balaayo waa joogtaa. Ilaahoow na badbaadi. Bal iska keen aabbo. Ilaahoow noo ceeb astur!

**Qawdhan**: Cadkii ayuu soo qaaday oo wuxuu yimid xaruntii Wiilwaal oo dadkii oo dhan ay tuban yihiin oo la wada sugayo natiijada ka soo baxda cadadkii ay dadku keeneen.

**Dadku maxay keeneen?** Dadku aad ayay ugu kala duwanaaayeen fikirka. Nin waliba wuxuu keenay cad uu is lahaa waa cadka dadka walaaleeya. Dadka qaar waxay keeneen, beer adhi, maskax adhi, feedho, misig, garab. Qaarna waxay keenaan, lag, lug, kalyo, dhuux, subag iwm. Qawdhan isaga oo aad u cabsanaya ayuu isna goobtii yimid. Dabadeedna cadkii uu waday ayuu soo bixiyay oo dhigay meel gees ah, isaga oo is leh cadka qari, yaan la arkinee. Dabadeedna dadkii oo dhan ayaa soo wada fiiriyay oo la wada yaabay odayga. Wiilwaal ayaa isaguna indhaha ku dhuftay cadkii uu odaygu waday. Markan waxaa la gaadhay xilligii lagu dhawaaqi lahaa qofkii xujada ku guulaystay.

**Qarad oo ku guulaysatay xujadii**: Wiilwaal ayaa soo kacay. Dadkii oo dhan way fadhiisteen. Dabadeedna Wiilwaal ayaa yidhi. Waxaan ku dhawaaqaynaa natiijadii tartanka. Dabadeedna Wiilwaal wuxuu soo qaaday cadkii hunguriga ahaa ee odaygu watay. Wuxuuna cod dheer ku yidhi ”War yaa cadkan watay?. Saa dadkii oo dhan ayaa ku dhawaaqay. Odaygaas ayaa watay. Dabadeedna Wiilwaal ayaa odayga su,aalo waydiinaya.

**Wiilwaal**. Sidee baad cadkan ku keenaty?

**Qawdhan:** Qawdhan oo gariiraya ayaa yidhi; Garaad, een een Tu, aan dhalay ayaa i waashay oo iisoo dhiibtay cadkan, ee aniga ra,yigayga ma ahayn in aan cadkan keeno!.

**Wiilwal:** oo gabadhu maxay ku tidhi?

**Qawdhan**: Garaad waxay igu tidhi ”cadka dadka walaaleeya, iskuna dira waa hunguri, sidaas daraadeed cadka hunguriga neefka qaad ayay igu tidhi.

**Wiilwaal**: Haddaba dadwaynoow i dhagaysta! Xujadii waxaa furtay gabadha uu dhalay qawdhan ee Qarad.

Dabadeedna dadkii oo dhan ayaa yaabaya, oo odayga hal mar wada fiirinaya. Waxayna la yaabayaan xikmadda gabadha yarta ah ku jirta ee dadka oo dhan ay garan waayeen.

**Wiilwaal**: Waxaan codsanayaa maaddaama aan garaadkiinnii ahay in Qarad la ii dhiso oo ay xaas ii noqoto oo boqol halaad iyo baarqabkoodana la iga qaado. Maaddaama ay tahay qofka ugu xikmadda badan deegaanka.

**Qawdhan**: Wuxuu aqbalayaa dalabka Garaadka. Sidaas ayuu Wiilwaal ku guursaday Qarad.

### Qaybta 1aad: ka jawaab su,aalaha soo socda

1) Maxay ahayd sababtii uu Wiilwaal dadka u xujaystay?

……………………………………………………………………………………..

……………………………………………………………………………………..

2) Sharax sababta uu hungurigu u yahay waxa dadka walaaleeya ama isku dira?

……………………………………………………………………………………..

……………………………………………………………………………………..

……………………………………………………………………………………..

3) Maxay ahayd sababtii uu odayga Qawdhan uga cabsanaayay Wiilwaal?

……………………………………………………………………………………..

……………………………………………………………………………………..

4) Odayga Qawdhan iyo gabadhiisa maxay ka faa,iideen xujadii ay fureen?

……………………………………………………………………………………..

……………………………………………………………………………………..

5) Sheeg qaar ka mid ah cadadkii kale oo ay keeneen dadkii kale?

……………………………………………………………………………………..

……………………………………………………………………………………..

### Qaybta 2aad: Erayadan hoos ku qoran gali meesha bannaan ee ku habboon.

(Reer-magaal, Dhakhtarka, Muqdisho, dumaashi, aayo,Balad-wayne, gaar, gaari, Gaalkacyo, kani, reer-miyi, kani, baarri, caasi, guud, baad, nafaqo)

1) ___________________ dadka xanuunsan ayuu daaweeyaa.
2) ____________________ waa doon, doonta waa lagu kaluumaystaa.
3) Dadka soomaaliyeed waxaa loo kala qaybiyaa ________________ .
   iyo ___________________
4) Qofka hooyadii iyo aabihiis aan si fiican u maqlin oo aan si fiican ula shaqaynin waxaa la yiraahdaa ___________________
5) Caanaha geela waxaa laga helaa tamar iyo ___________________ badan.
6) Geela waxaa hadba loo kexeeyaa meeshii biyo iyo ___________________ leh.
7) Magaca waxaa loo kala qaybin karaa magac __________________ ah iyo Magac _____________________ ah.
8) ____________________ waa wariye, waa wariayaha ugu caansan soomaaliya.
9) Walaalkay naagta uu qabo waxaa la dhahaa___________________________.
10) Caasimadda gobolka Banaadir waa __________________________________.